# Talaabo ka qaadista musuqa socdaalka

Maarso 27, 2024 Weydiimaha saxaafadda

## Dowladda Alberta waxay xoojinaysaa oo balaarinaysaa kahortagga musuqa barnaamijka Faa'iidada Socdaalka ee Alberta (Alberta Advantage Immigration program) si wax looga qabto musuqa socdaalka ee sii kordhaya.

Hay'adaha sharciga, daneeyeyaasha, saraakiisha socdaalka ee federaalka iyo gobolada iyo dhulalka ayaa soo sheegaya kororka baaxadda iyo kakanaata musuqa socdaalka, taasoo si aan wanaagsanayn u saamaynaysa dadkii rajaynayay inay Alberta ka dhigtaan hoygooda.

Barnaamijka Faa'iidada Socdaalka ee Alberta wuxuu leeyahay nidaam hadda looga hortagayo musuqa socdaalka dowladduna waxay soo kordhinaysaa tallaabooyin dheeraad ah oo ay ku ilaalinayso dadka soo galootiga ah. Talaabooyinka kahortagga musuqa ee la balaariyay waxaa kamid noqon doona ogaanshaha musuqa, khubaro ku takhasustay baaritaanka, iyo xoojinta uqalmidda shaqooyinka diyaarka ah iyo heerarka ansixinta si loo adkeeyo tallaabooyinka ilaalinaya dadka soogalootida ah iyo in si wanaagsan loo ilaaliyo heerka dhaqaale ee soogalootida.

Marka laga tago talaabooyinkan, dowladda Alberta waxay sii wadi doontaa inay la shaqayso wasaaradaha, iyo gobolada iyo goobaha kale iyo dowladda federaalka ah si wax looga qabto musuqa socdaalka.

“Socdaalka loo socdaalayo si loo helo fursado dhaqaale oo wanaagsan waxay lagama maarmaan u tahay barwaaqada gobolkeena. Anaga oo si dhakhso ah uga jawaabayna kakanaanshaha iyo baaxadda sii kordhaysa ee musuqa, waxaan sii wadi doonnaa ilaalinta danaha bulshadeenna, warshadaheenna iyo shaqaalaheenna waxaana taageeraynaa kobaca dhaqaalaha ee Alberta. Arintani waxay sidoo kale naga caawinaysaa xaqiijinta inaan daboolno baahiyaha dadka soo galootiga ah ee aan kusoo dhaweynayno Alberta.”

*Muhammad Yaseen, Wasiirka Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan*

“Barnaamijka Faa’iidada Socdaalka ee Alberta wuxuu muujinayaa ifafaale wanaagsan oo ku yimaada bulshadeena reer miyiga ah ayada oo loo isticmaalayo in lagu xalinayo shaqaale yarideena. Wuxuu dadkeena awood u siiyay inay soo jiitaan tobanaan shaqaalaha xirfadaha leh ah oo tagaya magaalooyinka yaryar, ayaga oo qoysaskooda keenaya. Shaqaalaha dowladda hoose ee safka hore kaga jira barnaamijkan waxaa kusoo dhacayay kumanaan codsiyo waxayna khatar ugu jiraan iskudayada musuqa ee ay bilaa shakiga tahay inay nasiib darradii dhacaan. Waxaan wasiirka ugu tahniyadaynaynaa inuu qaaday talaabooyin degdeg ah si wax looga qabto arrimahan si dadkeenu diiradda u saaraan helitaanka dad cusub oo gudan kara shaqooyinka deegaankeenna kajira."

*Jim Willett, chair, SouthGrow Regional Initiative*

## Barnaamijka Faa’iidada Socdaalka ee Alberta

Barnaamijka Faa’iidada Socdaalka ee Alberta waa barnaamij socdaalka dhaqaalaha ah kaasoo xoojinaya kobciyana dhaqaalaha asaga oo soo jiidanaya shaqaalaha xirfadda leh, ee loo baahan yahay si ay u buuxiyaan gaabiska shaqaalo yarida jirta, iyo sidoo kale hal abuureyaasha ganacsiga ee doonaya inay bilaabaan ama ay kobciyaan ganacsiga shaqooyinna abuuraan. Asaga oo la shaqaynaya dowladda federaalka ah, barnaamijku wuxuu dowladda Alberta awood u siinayaa wax ka qabashada caqabadaha kajira suuqa shaqada ee gobolka iyo gaabiska jira ayada oo la magacaabayo shakhsiyaadka loo baahan yahay.

2023, Alberta waxay lahayd shaqaalaysiintii ugu badnayd ee gobolada oo dhan, shaqaalaysiinta rasmiga ah ee wakhtiga buuxa ahina waxay gaartay 80 boqolkiiba wadarta guud ee shaqaalaysiinaha Alberta. Shaqaale yaraantu waxay wali kajirtaa qaybo ganacsi oo gaar ah Barnaamijka Faa’iidada Socdaalka ee Albert-na wuxuu shaqo galiyeyaasha ka caawinayaa sidii ay u heli lahaayeen shaqaalaha ay u baahan yihiin.

## Xaqiiqooyinka kooban

- Musuqa socdaalka waxaa kamid ah:
    - **In lacag lagu qaato shaqo siinta.** Haddii loo shaqeeyuhu ama hay’adda loo shaqaynayaa ay ka qaado
      kharash lacag ah nooc walba oo uu yahay, dowladda Alberta ayaa gacan ka gaysan karta. Wac khadkeena macluumaadka 310-0000 waxaadna

codsataa inaad la hadasho Heerarka Shaqaalaysiinta (Employment Standards) ama Xaafiiska Shaqaalaha Ajanabiga ah ee Kumeelgaarka ah (Temporary Foreign Worker Advisory Office).
    - **Macluumaadka been abuurka ah ama marin habaabinta ah** ee ku xusan codsiga AAIP waxaa loo arkayaa inuu yahay wax isdaba marin. Macluumaadka khaladka ah, marin habaabinta ah, ama been abuurka ah wuxuu horseedi karaa in codsiga codsadaha la diido codsadahana laga mamnuuco (dib) u codsashada barnaamijka muddo shan sanno ah.
    - **Qaladaadka qoloda sadexaad.** Marka ay matalayso codsadaha, diiwaangaliyaha qolada sadexaad ah ama wakiilka socdaalka ka socda ayaa samaynaya howlo aan sharciga waafaqsanayn, aan loo ogalayn, been abuur ah iyo/ama kuwo kale oo aan shaqo wanaagsan ahayn.
- Nidaamyada AAIP ee hadda jira ee loo adeegsado kahortaga been abuurka iyo ilaalinta qiyamka barnaamika waxaa kamid ah:
    - Bookhashooyinka goobta shaqaalaysiiyaha iyo hubinta shaqo siinta, waraaqaha tixraaca, dukumiintiyada waxbarashada iyo imtixaanka luuqadda oo ilo kala duwan leh.
    - Taxliilinta xogta iyo in ururada kale lagala shaqeeyo go’aaminta sharciyadda ganacsiyada ama wakiilka socdaalka ee xiriirka la leh codsi ama codsiyo badan.
    - Dib u eegista halka dhinac ah ee ku saabsan dib uga fiirsashada go’aanada aan wanaagsanayn ee caqabadaha leh ee u qalmitaanka.
    - Isku dhafidda maaraynta khatarta ee waxtarka leh, hubinta tayada, iyo kahortagista been musuqa iyo nidaamyada aqoonsigooda.

## Macluumaadka la xidhiidha

- Barnaamijka Faa’iidada Socdaalka ee Alberta (AAIP)
- Qaababka codsiyada ee AAIP

## Su’aalaha warbaahinta


### Michael Kwas

780-264-5368
Xoghayaha Saxaafada, Socdaalka iyo Dhaqamada Kala Duwan